

**WAX KA BADAL IYO KAABIS XEERKA DIIWAAN GELINTA CODBIXIYAASHA (2014),
AHNA LIFAAQA 1AAD EE 2016**
[Siduu uu ugu soo baxay [Faafinta Rasmiga Ah, Cadadkii May 2016 ee 4 Juun 2016](#)]

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa



Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha Wakiilada
Xarunta Hargeisa

Ref: GW/G/KF-30/695/2016

Date: 30/04/2016

**Go'aanka Ansixinta Soojeedinta Wax ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka
Diiwaangelinta Codbixiyaasha**

Lifaaqa Koowaad
Xeer Lr. 37/2007

- Markuu arkay: Qodobka 4aad Faq 1aad, 9aad Faq (1) iyo 22aad Faq (2) ee Dastuurka Qaranka JSL
- Markuu arkay: Muhiimada ay leedahay Diwaangelinta Muwaadinka iyo Diwaangelinta Cod-bixiyayaasha
- Markuu Dersay: Soo jeedinta Madaxweynaha ee Wax ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha Xeer **Lr. 37/2007** kuna taariikhaysan 30/3/2016 tirsigiisuna ahaa **JSL/M/SHGW/081-3937/032016**
- Markuu Tixgaliyay: Duruufaheheena la xidhiidha geedi socodka diimuqraadiyadda iyo suurogelinta in la helo doorasho u dhacda si cadaalad ah
- Markuu arkay: Go'aanka ansixinta Xeer **Lr. 37/2007** ee Golaha Wakiiladu u gudbiyeen Golaha Guurtida JSL kuna taariikhaysanaa 18/4/2016
- Markuu arkay: Go'aanka ansixinta Xeer **Lr. 37/2007** ee Golaha Guurtida SL kuna taariikhaysanaa **30/4/2016**
- Markuu arkay: In Golaha Guurtidu aanay wax ka bedel iyo kaabis ku samaynin kuna ansixiyeen cod dhan **(45) shan iyo afatan mudane** Wax ka bedelka iyo kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha ee Xeer **Lr. 37/2007** kuna ansixiyeen sidii Golaha Wakiiladu ugu gudbiyeen

WUXUU

Golaha Wakiilada JSL halkan ugu soo gudbinayaa Madaxweynaha JSL Xeer Lr. 37/2007 Wax ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwangelinta Codbixiyayaasha Somaliland si uu uga guuto waajibaadkiisa Dastuuriga ah.

ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xog. Guud ee Golaha Wakiilada JSL

Baashe Maxamed Faarax
K/S Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

WAX KA BADAL IYO KAABIS LIFAAQ U AH XEERKA DIIWAAN GELINTA
CODBIXIYAASHA XEE LR 37/2007

Lifaaqa 1aad

Wax ka badlkan iyo/ama kaabista Xeerka Diwaan Gelinta Codbixiyayaasha Xeer Lr 37/2007 (ee dib loo habeeyay 2014kii) waxuu saamayn ku yeelanayaa Qodobka 7aad Farqadiisa (2) iyo Qodobka 26aad Faqradiisa (2).

Qodobka 7aad

KAYDINTA DIIWAANGELINTA IYO SOO SAARISTA LIISASKA KAMA DAMBAYSTA AH

2. Komishankuna waxa xil ka saaran yahay kaydinta, xafidaadda iyo soo saarida liiska kama dambeysta ah ee diiwaangelinta cod-bixiyayaasha **6 Bilood** gudahood maalinta doorashada.

Qodobka 26aad

HABKA DIIWAANGELINTA CODBIXIYAYAASHA

2. Liiska diiwaanka cod-bixiyayaasha waxa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka Qaranka **Lix bilood (6)** Gudahood xilliga **doorasho**.

ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xog. Guud ee Golaha Wakiilada JSL

Baashe Maxamed Faarax
K/S Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL